Warbixinta daryeel qaataha

Diiwaanka tayada qaranka ee buurnaanta caruurta, BORIS

Si loo horumariyo oo loo hubiyo tayada daryeelka buurnaanta caruurta waxa DARYEEL BIXIYUHU doonayaa inuu warbixinaha ku saabsan ilmihiina uga warramo diiwaanka tayada Qaranka ee loogu talo galay buurnaanta caruurta, BORIS. Maamulka caafimaadka ee Gobolka Stockholm waa mas'uulka muhiimka ee warbixinta shakhsiga u qaabilsan BORIS. DARYEEL BIXIYUHU waa mas'uulka warbixinta shakhsiga ee qaabilsan maaraynta la xiriirta in warbixinaha ku saabsan ilmahaaga la kaydiyo oo lagu diiwaan geliyo BORIS.

Haddii aanaydin doonayn in warbixinaha ku saabsan ilmahaaga laga diiwaan geliyo BORIS, si wanaagsan ula xiriir .....
(wakiilka DARYEEL BIXIYAHA)

Waxad caawimaad ka geysanaysaan daryeel wanaagsan!
Iyadoo laga mid ahaado BORIS waxa ilmahaagu uu caawimaad ka geysanayaa in la sii wanaajiyo daryeelka buurnaanta caruurta. Warbixinaha waxa loo isticmaalayaa in la is-barbardhigo daryeelka buurnaanta caruurta ee u dhaxeeya isbitaalada kala duwan iyo xarumaha daryeelka caruurta ee waddanka oo dhan. Natiijada waxanu ka dib u isticmaalnaa shaqadayada sii wanaajinta daryeelka. Diiwaanka tayadu wuxu caawimaad ka gaysanayaa aqoon cusub oo ku saabsan sidaanu u daryeeli lahayn buurnaanta caruurta oo markay sii badato ka qayb-qaadashadu waxay hubaal ka sii dhigaysaa natiijada.

Warbixinaha la diiwaan gelinayo
Si loo horumariyo oo loo hubiyo tayada buurnaanta caruurta waxanu doonaynaa inaanu diiwaan gelino warbixinaha ku saabsan ilmahaaga ee taariikhda dhalashada, isaga/iyada xiriiryadooda daryeel ee ay nala leeyihiin, daryeelid iyo natiijada baaritaanada.

Sidan ayaa loo maaraynayaa warbixinaha ku saabsan ilmahaaga
Warbixnaha ku saabsan ilmahaaga waxa laga soo qaadanayaa diiwaanka isbitaal ee ilmaha iyo ka idinkaba. Warbixnaha ku jira diiwaanka tayada waxa keliya oo loo isticmaalayaa sidi loo horumarin lahaa oo loo hubin lahaa tayada buurnaanta caruurta, soo bandhigida tirakoob iyo baaritaan. Warbixnaha waxa xitaa ka dib hubinta arrimaha qarsoodiga ah la siinayaa qof warbixinahan u isticmaala wixi loogu talogalay saddexdan ujeedo. Haddii warbixin laga dhiibayo BORIS waxa ay u dhici kartaa qaab elaktaroonig ah.

Qarsoodi
Warbixinaha ilmahiina waxa ilaalinaya qarsoodiga daryeelka caafimaadka iyo bukaanka ee sharciga mabda'a ilaalinta iyo qarsoodiga. Tan macnaheedu waa in qaanuunka ugu muhiimsan yahay in warbixinaha ku saabsan ilmahiina laga gudbin karo oo keliya BORIS haddii ay caddahay in ilmahiina iyo idinka waalid ahaan/mas'uulka ilmaha midnaba aanay la kulmayn dhib haddii warbixinta la gudbiyo.

Amaanka
Warbixinaha ilmahaaga ee ku jira BORIS waxa laga ilaalinaya kuwa aan xaq u lahayn. Waxa jira shuruudo gaar ah dhinaca tallaabooyinka amaanka oo taas macnaheeda ay ka mid tahay in

qofka baahi u leh warbixinaha oo keliya uu helayo fursad uu ku isticmaalo iyaga, in la hubinayo in cid aan xaq u lahayn ay qayb ahaan u hesho warbixinahan, in warbixinahan lagu ilaalinayo iyadoo qoraal gaar ah ku qoran iyo in gelitaanka si loo helo warbixinta uu u dhacayo oo keliya qaab hubaal ah.

Helitaanka
DARYEEL BIXIYE oo ah daryeel bixiyaha soo geliya warbixinaha waxay helitaan toos ah u haystaan warbixinta ku diiwaan gashan BORIS. Ma jiro daryeel bixiye kale oo haysta helitaanka tooska ah ee warbixinaha. Maamulka caafimaadka ee Gobolka Stockholm oo ah mas'uulka diiwaankan ayaa qaadan kara warbixinaha ku saabsan ilmahiina.

Ka takhallusid wixii aan loo baahnayn
Warbixinaha ku saabsan ilmahiina waxa laga takhallusayaa marka aanay jirin baahi dheeri ah oo loogu talogalay horumarinta iyo hubinta tayada daryeelka buurnaanta caruurta.

Xuquuqaha
Waxa aad xilliga aad doontaan xaq u leedihiin helitaanka in warbixinaha ku saabsan ilmahiina laga saaro BORIS. Waxa kale oo aad xaq u leedihiin helitaanka warbixin ku saabsan nooca isticmaal ee ku dhacay warbixinaha ilmahiina. Waxa aad xitaa xaq u leedihiin magdhow haddii warbixinaha shakhsiga loo maareeyay si ka soo horjeeda sharciga warbixinta shakhsiga ama sharciga macluumaadka daryeel qataha. Haddii warbixinaha shakhsiga loo maareeyay si ka soo horjeeda sharciga warbixinta shakhsiga waxa aad xitaa xaq u leedihiin in la codsaso sixitaanka warbixinahan. Waxa aad sanadkiba hal mar, lacag l'aan, xaq u leedihiin in la helo ogaanshaha nooca warbixinaha shakhsiga ee diiwaan gashan kuna saabsan ilmahiina (diiwaanka qoraalka ah). Codsiga noocan ahi waa inuu ahaadaa mid qoraaal ah, ay saxeexeen labada waalid/mas'uul oo loo diro qofka xiriirka ee hoos ku qoran.

Ma doonaysaan warbixin dheeraad ah oo ku saabsan BORIS, la xiriir:
..... *(wakiilka DARYEEL BIXIYAHA)*

Ma doonaysaan diiwaanka qoraalka ah ee ilmahiina, codsigiina oo qoraal ah u dir:
Pernilla Danielsson Liljeqvist
Karolinska Universitetssjukhuset Huddinge/Karolinska Institutet
Blickagången 6A, Novum
141 57 Huddinge
(wakiilka Maamulka caafimaadka ee Gobolka Stockholm)

Ma doonaysaan in warbixinaha ilmahiin laga saaro diiwaanka, la xiriir:
Pernilla Danielsson Liljeqvist
pernilla.danielsson-liljeqvist@regionstockholm.se
08-585 874 23
(wakiilka Maamulka caafimaadka ee Gobolka Stockholm)